**<u>Su'aalaha Badanaa La Iska Weydiiyo (FAQ) Fasaxa Qoyska iyo ka Caafimaadka ee Mushaharka La Qaato (PFML)</u>**

**Fiiro gaar ah:** Su'aalahan Badanaa La Is Weydiiyo waxa loogu talagalay inay ka caawiyaan loo shaqeeyeyaasha iyo shaqaalaha inay si wanaagsan u fahmaan xuquuqdooda iyo masuuliyadahooda iyo inay dhex mushaaxaan Sharciga Fasaxa Qoyska iyo Ka Caafimaadka ee Mushaharka La Qaato ee Maine. Dukumintigani waxa uu bixiyaa hagitaan balse ma beddelo awoodda Sharciga ama Xeerarka barnaamijka. Macluumaadka ku jira hagitaankan waa kuwo la beddeli karo. Booqo https://www.maine.gov/paidleave/ si aad u hesho macluumaadka ugu dambeeyey.

**<u>Guudmarka sharciga Fasaxa Qoyska iyo Ka Caafimaadka ee Mushaharka La Qaato:</u>**

**1. Waa maxay Barnaamijka Fasaxa Qoyska iyo Ka Caafimaadka ee Mushaharka La Qaato (Barnaamijka PFML)?**

Sharciga PFML ee Maine waxa uu bixin doonaa 12 toddobaad oo fasax ah oo mushaharka la qaato oo ah fasax qoys, fasax caafmaad, si loogu la tacaalo kala guurka shaqagelinta milatari ee laalan ee xubin qoys ama ammaan ahaanshaha kadib xadgudub ama waxyeello. Sharcigani waxa uu dhaqangalay Oktoobar 2023, iyada oo qaybaha waaweyn ee sharciga la fulin doono sanadada 2025 iyo 2026. Waaxda Maine ee Shaqaalaha (MDOL) ayaa masuul ka ah dhaqangelinta barnaamijkan cusub.

**<u>Lacag-isku-darista:</u>**

**2. Halkee baa ay ka imanayaan lacag-isku-daristu laga bilaabo Janaayo 1, 2025? Lacag-isku-darista ma waxa bixiya shaqaalaha, loo shaqeeyaha, mise labadoodaba?**

Loo shaqeeyaha iyo shaqaalaha labaduba waxa ay isku daraan lacagta oo u xawilaan Sanduuqa PFML ka. Dhammaan lacagaha waa la isku daraa si loogu bixiyo sheegashooyinka mustaqbalka iyo kharashaadka maamul ee kale. Ka jarisaha mushaharka ee lagu sameeyo mushaharka shaqaalaha iyada oo loogu talagalayo barnaamijka Fasaxa Qoyska iyo Ka Caafimaadka ee Mushaharka La Qaato waxa ay la bilaabmi doontaa taariikhaha mushaharka ee marka la gaadho ama kadib Janaayo 1, 2025, waxana lagu shubi doonaa Sanduuqa Fasaxa Qoyska iyo Ka Caafimaadka ee Mushaharka La Qaato ee Maine. ("Sanduuqa PFML").

**3. Haddii aanay dheefuhu dhaqangalayn illaa la gaadho 2026 ka, waa maxay sababta lacag-isku-darista loo sameynayaa 2025 ka?**

Inkasta oo dheefaha loo muddeeyey inay bilaabmaan Maajo 1, 2026, lacag-isku-darista mushaharka shaqaaluhu waxa ay bilaabmi doonaan 2025 ka si wakhti loogu helo in lacago ku filani u ururaan in lagu bixiyo dheefaha iyo hawlgallada barnaamijka.

**4. Waa maxay xaddiga lacag-isku-darista ee loogu talagalay Fasaxa Qoyska iyo ka Caafimaadka ee Mushaharka La Qaato?**

Sanadada 2025-2027 ka, xaddiga lacag-isku-darista oo la isku geeyey ee loo shaqeeyeyaasha iyo shaqaalaha waxa lagu fadhiisiyaa 0.5 ama 1 boqolkiiba mushaharrada midkood iyada oo lagu salaynayo xajmiga loo shaqeeyaha. Wax ka badan 0.5 boqolkiiba kama iman karaan shaqaalaha. Loo shaqeeyeyaasha leh 15 ama wax ka badan oo shaqaale ah waxa ay ku dari doonaan 1 boqolkiiba mushaharada waxana ay ka jari karaan illaa kala badh lacag-ku-darista laga jaray mushaharada shaqaalaha. Loo shaqeeyeyaasha leh wax ka yar 15 shaqaale ah waxa ay ku dari doonaan 0.5 boqolkiiba mushaharada waxana ay ka jari karaan dhammaan xaddiga laga jaray mushaharada shaqaalaha.

**5. Waa maxay qeexitaanka mushaharrada ee barnaamijku?**

Mushaharrada waxa ku jira dhammaan noocyada magdhawga adeegyada shakhsiyeed, sida mushaharka joogtada ah, baqshiishka, koomishanka, gunnooyinka, iyo kharashka dhammaadka shaqada. Kuma jiraan kharashyada la siiyo qandaraasleyaasha madaxa bannaan.

Ujeedooyin mushahar-bixin iyo kharash-bixin caymiseed awgood, mushaharrada waxa loo xisaabiyaa si lamid ah sida mushaharrada Shaqo La'aanta Maine loo go'aamiyo balse waxa lagu dabbaqaa koox ballaadhan oo ah shaqaale aan caadi ahaan hoos iman cashuurta lacag-isku-darista Shaqo La'aanta Maine. Dhammaan mushaharrada laga kasbado Maine waa in lagaga warbixiyo warbixinta mushaharka xaddiga kharashka caymiska ayaana la xisaabin doonaa si looga reebo xaddiyada dhaafsan xaddiga seeska sanadlaha ah ee uu dejiyey Maamulka Sooshal Sekeyuuritiga Maraykanka.

**6. Sidee baa deegaanka Mushaharrada laga kasbado ee Maine loo go'aamiyaa?**

Barnaamijka PFML waxa uu adeegsan doonaa isla tijaabada deegaanka ee hoos timaadda sharciga shaqo la'aanta Maine. Guud ahaan - haddii loo shaqeeye hoos imanaya Caymiska Shaqo La'aanta Maine (UI) uu ku daro shaqaale UI ga Maine ah oo ku salaysan deegaanka UI, shaqaalahaasi waxa uu sidoo kale hoos imanayaa PFML ka Maine. Haddii loo shaqeeye uu ku daro shaqaale warbixin UI oo gobol kale ah oo ku salaysan deegaanka UI, PFML ayaa qaadanaysa booska in shaqada shaqaalaha ay deegaankeedu taha isla gobolkaas ujeedooyin PFML awgood. Si walba ha noqotee, xaaladaha nooca loo shaqeeyaha ama shaqaaluhu aanu hoos iman sharciga shaqo la'aanta Maine ama mid gobol kale balse uu hoos yimaaddo PFML ka Maine, markaa deegaanka waa in la xaqiijiyaa. Shaqaale kasbanaya mushaharo Maine ah waxa lagu go'aamin karaa baadhis taxane ah oo afar shardi ah, oo lagu dabbaqo shaqaalaha:

Afar qodob, oo si taxane ah loo qaado, ayaa go'aamiya in shaqada lagaga warbixiyo ama aan lagaga warbixin Maine:

- **Goobta Shaqada Lagu Qabto:** Haddii shaqaaluhu ku qabto dhammaan shaqada Maine, ama haddii shaqada ka baxsan Maine aanay aad muhiim u ahayn (ku meelgaadh ama mid yar), markaa sharciga Maine ayaa khuseeya. Haddii tani aanay khuseyn, u soco qodobka xiga.

- **Xarunta Hawlgallada:** Haddii shaqaaluhu uu shaqo ka qabto Maine iyo gobollo kale, haddii xarunta hawlgalladu ku taallo Maine, sharciga Maine ayaa khuseeya. Xarunta hawlgalladu waa goobta koowaad ee shaqaaluhu ka bilaabo shaqada isla markaana uu si joogto ah ugu soo noqdo. Haddii tani aanay khuseyn u soco qodobka xiga.

- **Goobta Adeegga Laga Hago ama Laga Maamulo:** Haddii shaqaaluhu uu ka qabto shaqo Maine oo adeeggana laga hago ama laga maamulo Maine, sharciga Maine ayaa khuseeya. Tani waxa ay tilmaamaysaa goobta maamulka guud ee ma tilmaamayso kormeerka tooska ah. Haddii tani aanay khuseyn, u soco qodobka xiga.

- **Goobta Deganaanshiyaha:** Haddii shuruudda sare midkoodna aanay khusayn, oo shaqaaluhu shaqada ka qabto Maine iyo gobollo kale, isla markaana uu deggan yahay Maine, markaa sharciga Maine ayaa khuseeya. Haddii kuwa sare midkoodna aanu khuseyn, shaqadu ma aha mid lagaga warbixin karo Maine.

### 7. Yaa masuul ka ah in uu lacag-ku-darista u xawilo Sanduuqa PFML?

Loo shaqeeyeyaasha ayaa masuul ka ah inay lacag-isku-darista u xawilaan Sanduuqa PFML iyaga uu u marinaya barta Fasaxa Mushaharka La Qaato ee Maine.

### 8. Miyaa musharada PFML yihiin mushaharo guud?

Si lamid ah qeexitaanka musharada ee Caymiska Shaqo La'aanta Maine, mushaharada PFML ma aha musharo guud balse waa "wadarta musharada u hoggaansan cashuuraha - "total subject wages". Wadarta mushaharka u hoggaansan cashuuraha "total subject wages" waa mushaharada guud oo laga reebay isla noocyada kharashbixinta la cafiyey sida ku xusan Sharciga Caymiska Shaqo La'aanta Gobolka iyo Xeerka Cashuurta Shaqo La'aanta Federaalka. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan noocyada kharashbixinta ee laga reebay waxa laga heli karaa Daabacaadda IRS 15 Circular E: 2025 Publication 15.

### 9. Miyaa mushaharrada barnaamijka PFML la xisaabiyaa kahor cashuurta mise kadib cashuurta?

Kharashyada caymiska waxa *lagu xisaabiyaa* mushaharrada ka qaybqaataha ee guud, kahor inta aan la jarin cashuurta dakhliga ee federaalka, cashuurta dakhliga ee gobolka, iyo Sooshal Sekeyuuritiga iyo cashuuraha Medicare.

**10. Miyaa Kharashyada Caymiska ee PFML la cashuuraa?**

Su'aasha ah in kharashyada caymiska ee PFML la cashuuri karo waxa ay ku xidhan tahay hagitaanka iyo hannaanada Adeegga Dakhliga Gudaha ee Federaalka "Federal Internal Revenue Service". IRS waxa ay baahisay hagitaan rasmi ah oo ku saabsan arrimaha cashuuridda taas oo laga eegi karo RR-25-04.

**11. Sidee baa kharashyada caymiska PFML u saameeyaan mushaharrada la cashuuro ee shaqaalaha?**

Kharashyada caymiska ee PFML ma dhimaan musharada loo xisaabiyo barnaamijyada cashuurta federaalka iyo gobolka ee kale. Kharashyada caymiska PFML waxa laga jaraa mushaharka shaqaalaha kadib marka cashuuraha federaalka iyo gobolka laga jaro.

Haddii loo shaqeeye uu go'aamiyo in uu bixiyo qayb kamid ah kharashyada caymiska PFML ee shaqaalaha, lacag-ku-biirinta loo shaqeeyuhu waa magdhaw dheeraad ah waxana loogu daraa dakhliga guud ee federaalka ee shaqaalaha ka musharo ahaan.

Shaqaaluhu waxa ay xaq u yeelan karaan ka jaritaanka kharash bixinada caymiska PFML ka cashuur dakhli gobol ahaan haddii ay ku tafsiiliyaan jaristooda cashuur celintooda dakhliga federaal. Dib u eeg RR-25-04 si aad macluumaad dheeraad ah uga hesho tan.

**12. Sidee baa kharashyada caymiska PFML u saameeyaan cashuuraha loo shaqeeyaha?**

Loo shaqeeyeyaashu waxa ay ka jari karaan qaybta kharashyada caymiska ee loo shaqeeyaha ee loo baahan yahay ka cashuur iib oo aan toos ahayn ahaan "excise tax".

Haddii loo shaqeeyuhu doorto in uu bixiyo qaybta kharashyada caymiska PFML ee loo shaqeeyaha, waxa ay uga jari karaan taas ka kharash ganacsi oo caadi ah oo daruuri ah ahaan.

Dib u eeg RR-25-04 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

**13. Maxay tahay in lagu qoro Sanduuqa 14 ee foomka W-2 ee lacag-isku-darista shaqaalaha?**

Lacag-isku-darista kharash-bixinta caymiseed ee shaqaalaha waa in lagu hoos qoraa Sanduuqa 14 ee foomka W-2 ee ay ku qoran tahay "MEPFML".

Haddii loo shaqeeye bixiyo lacag-isku-darista kharashka caymiska ee qaybta shaqaalaha, tan waa in loogu daro ka mushar ahaan Foomka W-2 ee shaqaalaha.

**14. Miyaa kharash-bixinada naafanimada ee uu kafaalo-qaado loo shaqeeyuhu iyo mushaharka xanuunka ee dhinac-saddexaad ay hoos yimaaddaan kharashyada caymiska PFML ee Maine?**

Si waafaqsan qeexitaanka mushaharada ee Caymiska Shaqo-la'aanta Gobolka, ee PFML sidoo kale adeegsato, kharash-bixinada naafanimada ee uu kafaalo-qaado loo shaqeeyuhu iyo mushaharka xanuunka ee dhinac-saddexaad (kharash-bixinada naafanimada muddada gaaban ee uu bixiyo wakiilka loo shaqeeyaha, caadiyan shirkad caymis) waxa loo tixgeliyaa inay yihiin mushaharro illaa la gaadhayo "*dhammaadka 6 da bilood ee ku xiga bishii ugu dambeysay ee shaqaaluhu u shaqeeyey loo shaqeeyaha*" sidaas darteedna waxa ay hoos yimaaddaan kharashyada caymiska PFML.

Haddii kharashyadan uu bixiyo dhinac saddexaad, loo shaqeeyuhu waa in uu la hadlo wakiilkiisa si ay u xisaabiyaan mushaharradan, haddii shaqaaluhu uu ka helayo loo shaqeeyaha mushahar aan ku filnayn bixinta kharashyadan caymiska inta uu ku gudo jiro fasaxan, loo shaqeeyuhu waxa uu isaga oo halka hore kasoo bilaabaya "retroactively" ka jari karaa kharashyada caymiska ee lagu leeyahay shaqaalaha sida ay dhigayso Qaybta X (L) ee kamid ah xeerarka PFML waxana uu kaga warbixinayaa mushaharradaas saddex-biloodka ka jaritaanadaas la sameeyey.

**15. Waa maxay ganaaxyada uu loo shaqeeye mudanayo haddii loo shaqeeye uu ku guuldarreysto bixinta lacag-isku-darista ama gudbinta warbixinta mushaharrada wakhtiga loogu talagalay?**

Ganaaxa uu loo shaqeeye mudanayo haddii uu ku guuldarreysto bixinta lacag-isku-darista iyo/ama gudbinta warbixinada mushaharrada waa 1 boqolkiiba kamid ah wadarta mushaharrada uu bixiyo saddex-biloodkiiba loo shaqeeyuhu. Ganaaxan ayaa la go'aamin doonaa haddii loo shaqeeyuhu uu ku guuldarreysto in uu bixiyo dhammaan ama qayb kamid ah lacag-isku-darista ay ku leedahay Waaxdu saddexdii biloodba mar. Loo shaqeeyeyaashu waxa ay heli doonaan ogaysiis haddii aanay bixin lacag-isku-darista ama aanay gudbin warbixinta mushaharka waxana la siin doonaa muddo wakhti ah oo ay ku saxaan arrinka kahor inta aan ganaax la saarin. Haddii loo shaqeeye ogaado in uu u baahan yahay in uu wax ka beddelo warbixinta mushaharka kadib taariikhda ay ku eg tahay sameynta sixitaanada, waxa la siin doonaa wakhti uu ku gudbiyo waajibka kharashka caymiska ee cusub kahor inta aan ganaaxa la saarin.

**16. Waxa aan ahay shakhsi is u shaqaysta, miyaan u qalmaa?**
Shakhsiyaadka iska u shaqaystaa waa ay u qalmaan Fasaxa Qoyska iyo Ka Caafimaadka ee Mushaharka La Qaato balse waa inay doortaan inay ka qaybgalaan si loo daboolo. Sanadada 2025-2027, xaddiga lacagta caymiska waxa lagu fadhiisiyey 0.5 boqolkiiba dakhliga shakhsiga kasoo gala is u shaqaysashada. Shakhsiyaadka iska-u-shaqaysta waxa ay dooran karaan daboolid iyaga oo u maraya barta Fasaxa Mushaharka La Qaato ee Maine.

**17. Waxa aan ahay shakhsi is-u-shaqaysta balse mushar uga kasbada shirkaddayda ka shaqaale ahaan, si otomaatig ah miyaa la igu daboolayaa sharciga?**

Mushaharka shakhsiga iska-u-shaqaystaa uga kasbado shirkaddiisa ka shaqaale ahaan waa kuwo hoos taga kharashyada caymis waana in lagu daro warbixinada mushaharka. Tusaale ahaan -

mushaharka macquulka ah ee shakhsiga iska-u-shaqaystaa uga helo ganacsigiisa S-Corp ka ah waa mid hoos yimaadda kharashyada caymis waana in lagu daro warbixinada mushaharka.

**18. Sidee baa Dawladaha Qabiileed "Tribal Goverments" uu u sameeyaa sharcigani?**
Dawladaha qabiileed waxa ay ikhtiyaar ku jira sharciga u leeyihiin inay u dooraan daboolid shaqaalahooda haddii ay doonayaan. Dawladaha qabiileed waxa ay ka qaybgeli karaan ka loo shaqeeye ahaan iyaga oo u maraya barta Fasaxa Mushaharka La Qaato si ay u doortaan dabooliddan.

**Heshiisyada Gorgortanka Kooxeed:**

**19. Sidee baa sharciga PFML u khuseeyaa heshiisyada gorgortanka kooxeed ee qaybta dawladeed?**

Loo shaqeeyeyaasha iyo shaqaalaha dawladda ee ku jira heshiis gorgortan kooxeed oo dhaqangal ahaa Oktoobar 25, 2023, loogama baahna inay ka qaybgalaan illaa heshiiska gorgortanka kooxeed uu wakhtigiisu dhaco. Labada dhinac midkoodna ma sameyn doonaan lacag-isku-daris la xidhiidha barnaamijka Fasaxa Qoyska iyo ka Caafimaadka ee Mushaharka La Qaato illaa heshiiskaas gorgortanka kooxeed uu wakhtigiisu dhaco, shakhsiyaadkuna uma qalmi doonaan gunnooyinka illaa la gaadho taariikhda dhicitaanka heshiiska gorgortanka kooxeed ama Maajo 2026, kolba ka dambeeya. MDOL waxa ay adeegsan doontaa taariikhda dhammaadka ee ku qoran heshiiska gorgortanka kooxeed ee khuseeya, iyada oo aan la tixgelineyn marka heshiiska gorgortanka kooxeed ee xiga la ansixiyo.

**20. Ka waran haddii labada dhinac ee ku wada jira heshiis gorgortan kooxeed qaybta dawladda ah ay ku heshiiyaan lacag-isku-darista kahor inta aan la gaadhin taariikhda dhicitaanka heshiiska?**

Loo shaqeeyeyaasha iyo shaqaalaha dawladda ee ku heshiiya, iyaga oo u maraya sharciga iyo hannaanka gorgortanka dadweyne ee khuseeya, inay sameeyaan lacag-isku-daris ku aaddan barnaamijka Fasaxa Qoyska iyo Ka Caafimaadka ee Mushaharka La Qaato kahor dhicitaanka heshiiska gorgortanka kooxeed kaas oo dhaqangal ahaa Oktoobar 25, 2023 waa ay sameyn karaan sidaas. Ka jaritaanadu waxa ay bilaabmi doonaan taariikhda mushaharka ee ugu horraysa kadib heshiiska marka la ansixiyo ama taariikhda mushaharka ee ugu horraysa ee Janaayo 2025, kolba ka dambeeya.

**21. Sidee baa ay tani u khusaysaa shaqaalaha dawliga ah ee aan ku jirin heshiis gorgortan kooxeed?**

Sharciga Fasaxa Qoyska iyo ka Caafimaadka ee Mushaharka La Qaato waxa uu khuseyn doonaa shaqaale dawladeed oo kasta oo aan ku jirin heshiis gorgortan kooxeed oo dhaqangalay Oktoobar 25, 2023 kii. Sidoo kale, shaqaale dawladeed oo kasta oo aan ku jirin heshiis gorgortan kooxeed guud ahaan waa kuwo uu barnaamijku u caymiyo si lamid ah shaqaalaha qaybta aan dawliga ahayn.

**22. Miyaa shaqaalaha sharciga looga dhaafayaa heshiis gorgortanka kooxeed ah oo dadweyne oo ay ku jiraan awgeed ee lagu sharxay kor ee ku qoran warbixinada mushaharka?**

Shaqaalaha looga cafiyey sharciga heshiis kooxeed oo dadweyne oo ay ku jiraan awgeed waa inaan lagu darin warbixinada mushaharka illaa la gaadho dhammaadka heshiiska gorgortanka kooxeed.

**23. Sidee baa sharciga PFML u khuseeyaa heshiisyada gorgortanka kooxeed ee qaybta aan dawliga ahayn?**

Cafinta ku jirta qaybta 850-B (10)(D) ma khusayso heshiisyada gorgortanka kooxeed ee qaybta aan dawliga ahayn.

**<u>Mareegta Fasaxa Mushaharka La Qaato ee Maine:</u>**

**24. Halkee baa ay loo shaqeeyeyaashu awoodi doonaan inay ku soo gudiyaan warbixinada kharash-bixinada caymiseed iyo mushaharrada?**

Loo shaqeeyeyaashu waxa ay ku soo gudbin karaan warbixinada kharash-bixinada caymiska iyo mushaharrada **Mareegta Fasaxa Mushaharka La Qaato ee Maine oo diyaar noqon doonta horraanta 2025**. Dhammaan loo shaqeeyeyaasha waxa looga baahan doonaa inay iska diiwaangeliyaan Waaxda iyaga oo u maraya mareegtan si loo go'aamiyo u qalmitaankooda lacag-isku-darista PFML iyo inay cid saddexaad u magacaabaan shirkad mushahar bixin ama kireyn shaqaale haddii ay doonayaan. Dhammaan loo shaqeeyeyaasha masuulka ah ee shaqaynaya waa inay akown ka samaystaan mareegta si ay qaab elegtaroonig ah ugu xareeyaan warbixinada mushaharrada ee saddex biloodka ah isla markaana u sameeyaan bixino lacag-isku-daris.

**25. Imisa goor baa ay tahay loo shaqeeyeyaashu inay u gudbiyaan warbixinada kharash-bixinada caymiseed iyo mushaharrada Barnaamijka PFML?**

Loo shaqeeyeyaashu waa inay gudbiyaan warbixinadooda xaddiyada kharash-bixinada caymiseed iyo lacag-isku-darista **saddexdii biloodba mar** waxana uu wakhtigeedu yahay marka la gaadho ama kahor maalinta ugu dambeysa bisha ku xigta dhammaadka saddex bilood kasta. Kharashbixinada iyo warbixinada waxa loo tixgeliyaa kuwo wakhtigii ku habboonaa la direy haddii elegtaroonig ahaan loo helo ugu dambeyn taariikhda kama dambeysta ah. Haddii taariikhda kama dambeysta ah ay ku dhacdo Sabti, Axad, ama fasax sharci ah, taariikhda kama dambeysta ahi waxa ay noqonaysaa maalinta shaqo ee xigta. Loo shaqeeyeyaashu waxa ay ka dalban karaan shirkad kirayn shaqaale ama maamul dhinac saddexaad ah oo ogolaansho haysta inay u gudbiyaan kharashbixinadooda iyo warbixinadooda.

**26. Miyaa awood loo yeelan doonaa in faylal waaweyn lagu gudbiyo mareegta?**

Masuullada dhinaca saddexaad ah ayaa awood u yeelan doona inay gudbiyaan warbixinada mushaharrada ee waaweyn iyaga oo ka dhigaya qaabab fayl oo cayiman. Loo shaqeeyeyaashu waxa ay awood u yeelan doonaan inay ku diraan waraaq excel oo macluumaadka shaqaalahooda

iyo mushaharka ah warbixintooda mushaharrada saddex biloodka ah. Waxa ay noqon doontaa inay raacaan shax ay bixiso Waaxdu.

**<u>Qeexitaanka Shaqaalaha La Daboolay "Covered Employee" iyo Masuuliyadda Kharash-bixinta Caymiseed:</u>**

### 27. Waa ayo shaqaalaha la daboolay?

"Shaqaalaha la daboolay" waa shaqaalaha ka mushahar qaata Maine. Si walba ha noqotee, mushaharrada kuma jiraan mushaharrada laga kasbado shaqada federaalka, kaalmada dhaqaale ee daraasadda shaqo ee federaal, muddada xabsiga, ka laga helay mutadawiciin cayiman sida lagu sheegay xeerka lasoo jeediyey, ama ka uu qaato shaqaale hoos taga Sharciga Caymiska Shaqo La'aanta Waddo Tareeka. Qandaraasleyaasha madaxa bannaan waxa ay dooran karaan daboolid, haddii ay sidaas tahayna waxa ay ka warbixin doonaan mushaharada la kasbaday waxana ay gudbin doonaan lacag-isku-daris si ay u noqdaan shakhsi la daboolay.

### 28. Si loo go'aamiyo masuuliyadda kharash-bixinta caymiseed ee loo shaqeeyeyaasha, sidee baad u tirinaysaa tirada shaqaalaha?

Ujeedooyinka go'aaminta masuuliyadda kharash-bixinada caymiseed awgood, loo shaqeeye kasta oo shaqo geliyey 15 ama wax ka badan oo shaqaale la daboolay ah si waafaqsan Lambarka Aqoonsiga Loo Shaqeeyaha Federaalka ee loo shaqeeyaha (FEIN) oo ay ugu jireen mushahar-bixintiisa uu dejiyey muddo 20 ama ka badan oo toddobaad shaqeed muddo 12-bilood ah kahor Sibtambar 30 keeda sanad walba. Tiradan waxa ku jirta wadarta guud ee shakhsiyaadka ku jira mushahar-bixinta shirkadda ee shaqeeya labada gellin ama halka gellin ee mushaharka qaatay qayb ka mid ah muddada mushahar qaadashada.

Shaqaalaha ku meelgaadhka ah iyo kuwa aan joogtada ahaynba waa ay ku jiraan, sidoo kale waxa ku jira shaqaalaha ku jira fasax xanuun oo mushaharka la qaato, fasax mushaharka la qaato, ama kuwa shaqeeya inta lagu gudo jiro keliya qayb kamid ah muddo mushahar qaadasho oo cayiman. Oktoobar 1, 2024, iyo Oktoobar 1 ee sanadkasta intaas wixii ka dambeeya, loo shaqeeyuhu waxa uu xisaabin doonaa xajmigiisa iyada oo ujeedku yahay go'aaminta masuuliyadda kharash-bixinta caymiseed ee sanadka 2025 ka iyo sanadkasta oo ka dambeeya intaas kadib. Tiradan loo shaqeeyaha waxa laga warbixin doonaa isdiiwaangelinta ugu horaysa ee Mareegta Fasaxa Mushaharka La Qaato ee Maine, iyo inta lagu gudo jiro warbixinta mushaharka Saddex-biloodka 3 aad ee sanadlaha ah intaas wixii ka dambeeya.

### 29. Miyaa shaqaalaha lagu daraa tirada xajmiga shirkadda iyo warbixinada mushaharka xattaa haddii aanu kasban wax ku filan in uu u qalmo gunnooyinka?

Ujeedooyinka tirinta xajmiga loo shaqeeyaha, warbixinta mushaharka, iyo masuuliyadda kharashka caymiska awgood, shaqaalaha wax mushahar ah ka qaata Maine waa in lagu daraa. Sidaas darteed, shaqaaluhu waxa uu fursad u haystaa in uu kasbado seeska mushaharka ee daruuriga u ah u qalmitaanka gunnada iyada oo laga shaqaynayo shaqooyin badan loona marayo isbeddelo lagu sameeyo shaqada dhammaan muddada sanad gunneedka. U qalmitaanka

gunnooyinka laga helo buuxinta xadka mushaharka waxa la go'aamiyaa marka shaqaale la daboolay codsado gunnooyinka.

<u>**Qorshayaal Gaar ah:**</u>

**30. Waxaan ahay loo-shaqeeye leh siyaasad dhigaysa bixinta mushaharka wakhtiga fasaxa, wakhtiga jiirada iyo/ama siyaasadda naafada muddada gaaban. Miyaa siyaasaddayda fasaxa loo tixgalin karaa inay tahay qorshe sidii la rabay u waafaqsan Sharciga Maine PFML?**

Qaybta 850-H(2) waxay dhigaysaa si qorshayaal gaar ah loogu ansixiyo inay yihiin qaar sidii la rabay u waafaqsan yihiin sharciga, marka laga tago shuruudaha kale ee xeerkan dhigayo, qorshuhu waxa waajib ah inuu yahay mid isagu is-maalgaliya oo u baahan curaar dammaanad oo la siiyo Gobolka ama yahay qorshe si buuxda loo maalgaliyo oo laga oo gatay shirkad caymis. Siyaasad fasax oo gudeed, iyadu kaligeed ma buuxin karto shuruudahan. Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan hannaanka iyo shuruudaha qorshayaasha gaarka ah ayaa lagu iftiimiyey xeerka.

<u>**Nooca Qorshayaasha Gaarka ah:**</u>

**31. Waa kuwee noocyada qorsheyaasha ee loo tixgeliyo inay yihiin qorshe gaar ah oo hoos yimaadda sharciga Fasaxa Qoyska iyo ka Caafimaadka ee Mushaharka La Qaato ee Maine?**

Qorshuhu waa in uu noqdaa qorshe si buuxda loo caymiyey "fully insured" ama qorshe is-caymin "self-insured".

**32. Waa maxay qorshe si buuxda loo caymiyey?**

Qorshe si buuxda loo caymiyey waa qorshe caymis ay bixiso shirkad caymis oo loo ogol yahay inay ganacsi ka samayso Gobolka Maine. Qorshuhu waa in uu noqdaa mid la xaqiijiyey in uu u hoggaansan yahay shuruudaha hoos yimaadda Xeerka iyo Sharciga Fasaxa Qoyska iyo ka Caafimaadka ee Mushaharka La Qaato ee Maine. Qorsheyaasha caymiska ee aan helin xaqiijin ah inay u hoggaansan yihiin Xeerka iyo Sharcigu uma qalmaan beddelid.

**33. Waa maxay waraaqaha loo baahan yahay si loo gudbiyo codsi beddel si buuxda loo caymiyey?**

Qorsheyaasha si buuxda loo caymiyey waxa ay u baahan doonaan magaca shirkadda caymiska, lambarka siyaasadda, iyo iskaan lasoo diray oo ah siyaasadda caymiska ee loo soo saaray loo shaqeeyahaas cayiman. Inkasta oo loo shaqeeyaha ay waajib tahay in loo soo saaray siyaaadda qorshe la xaqiijiyey wakhtiga codsigiisa, haddana loo shaqeeyuhu waxa uu dooran karaa in uu dib ugu dhigo daboolidda gunnooyinka ee sheegashooyinka illaa la gaadho Maajo 1, 2026.

**34. Waa maxay qorshe is-caymin?**

Qorshe is-caymin waa qorshe caymis uu si toos ah u bixiyo loo shaqeeye, halkii ay bixin lahayd shirkad caymis.

**35. Waa maxay waraaqaha loo baahan yahay si loo helo qorshe is-caymin?**

Loo-shaqeeyayaashu waxa waajib ah inay ku bixiyaan Boortalka Fasaxa Mushaharka la Qaato ee Maine iskaan ah dokumentiyada qorshaha la soo jeediyey, codsiga qorshaha gaarka ah ee is-cayminta, oo ay bixiso Waaxdu, oo ay la socdaan iskaan ah curaarta dammaanadda oo ka timi shirkad dammaanadeed oo sharci ah oo ah qaabka iyo xaddiga ay ku sheegto Waaxdu dokumentiga codsiga. Curaarta dammaanadda waxa waajib ah inuu saxeexo sarkaal ka tirsan shirkadda dammaanadda ama wakiil sharci ah oo wata Awoodda Wakaaladda ee habboon. Hadduu wakiil sharci ah uu saxeexo, curaarta dammaanadda iyo Awoodda Wakaaladdu waxa waajib ah in la soo galiyo boortalka.

**36. Miyuu loo-shaqeeye shaqaalayn karaa cid kale si ay u maamusho beddelkiisa qorshaha gaarka ah ee is-cayminta?**

Loo-shaqeeyayaashu waxay qandaraas ku siin karaan cid shati ka haysata Maamulka Maine ee Caymiska si ay ugu noqoto maamule arrimaha caymiska caafimaadka. Shirkadaha caymiska ee shatiga ka haysta Xafiiska Caymiska ee Maine isla markaana oggolaansho u haysta maamulidda caymiska caafimaadka sidoo kale waxay bixin karaan maamulidda sheegashooyinka marka la eego beddelka qorshaha gaarka ah ee is-cayminta. Masuullada cabashooyinka dhinac saddexaad ee shatiga ka haysta Xafiiska Caymisku waa inaanay iska diiwaangelin Boortalka Lacag-isku-darista Fasaxa Mushaharka La Qaato ee Maine.

**37. Miyaa siyaasadaha kooxda la oggol yahay qorshayaasha sida buuxda u caynsan? Miyaa ammaana-haynta kooxda ee loo-shaqeeyayaasha badan la oggol yahay qorshayaasha is-cayminta?**

Siyaasadaha ama ammaana-haynta kooxda lama oggola ikhtiyaarka beddelka qorshaha gaarka loo leeyahay. Siyaadaha sida buuxda u caynsan, loo-shaqeeyuhu waxa waajib ah inuu isagu yahay ka ku qoran lahaanta siyaasadda. Siyaasadaha is-cayminta, loo-shaqeeyaha ayaa ka masuul ah hawlgalka qorshaha, xataa hadduu qandaraas ku siiyo qorshaha maamule gunno oo dhinac saddexaad ah, loo-shaqeeyaha ayaana masuul ka ah curaarta (bond) Gobolka.

**<u>Hannaanka iyo Dib U Eegista Codsiga:</u>**

**38. Goorma iyo sidee ayaa ay loo shaqeeyeyaashu ku codsan karaan beddel qorshe gaar ah?**

Codsiyada waxa la gudbin karaa kadib Abriil 1, 2025. Codsiyada waa in lagu gudbiyo onlayn iyada oo loo marayo Barta Fasaxa Mushaharka La Qaato ee Maine, taas oo la qorsheeyey in lasoo saaro horraanta 2025.

**39. Waa intee kharashka uu ku kacayo codsiga beddel qorshe gaar ahi?**

Waxa jira fii codsi oo ah $250 oo loogu talagalay dib u eegista oo aan celis lahayn haddii codsiga la aqbalo iyo haddii la diidaba. Waxa jira fii magdhaw kharash maamul oo ah $250 oo dheeraad ah haddii la ansixiyo. Fiigu waa mid kordhi kara.

**40. Muddo intee le'eg ayaa beddel qorshe gaar ah oo la ansixiyey uu shaqaynayaa?**

Beddel la ansixiyey waxa uu shaqaynayaa muddo saddex sano ah.

**41. Ayaa masuul ka noqon doona dib u eegista codsiyada?**

Waaxda ayaa masuul ka noqon doonta dib u eegista codsiyada qorsheyaasha gaarka ah.

**42. Haddii codsi la ansixiyo, goorma ayaa beddelku dhaqangal noqon doonaa?**

Ka dhaafidda waajibka kharashyada caymisku waxa ay bilaabmaysaa maalinta koowaad ee saddex-biloodka beddelka la ansixiyey, marka laga reebo haddii codsiga beddelka la gudbiyo wax ka yar 30 maalmood kahor dhammaadka saddex-biloodka, markaas oo dhaafiddu dhaqangal noqon doonto maalinta koowaad ee saddex-biloodka xiga marka codsiga beddelka la gudbiyo, marka laga soo qaado in la ansixiyey. Kharashyada caymiska ee qofka lagu lahaa kahor taariikhda dhaqangalka cafinta waa in weli loo xawilo barnaamijka iyada oo loo marayo Barta Fasaxa Mushaharka La Qaato ee Maine.

Si aad u aragto jaantus sharraxaadeed oo muujinaya goorta ka dhaafitaanada iyo ka jaritaanadu ay bilaabmaan ee dhammaadaan marka loo eego nooca qorshaha gaarka ah ee adeegsada taariikhaha aan dhabta ahayn ee tusaalaha ah, fadlan guji linkiga hoose si aad wax dheeraad ah u ogaato: PrivatePlanapprovalanddeductionstimeframesv2.pdf

**43. Miyaa loo shaqeeye racfaan ka qaadan karaa go'aan la xidhiidha beddelkiisa qorshaha gaarka ah?**

Haa, loo shaqeeye racfaan waa uu ka qaadan karaa diidmo beddel, diidmo joojin, ka noqoosho, ama soo saarid ganaax la xidhiidha xadgudub. Racfaanada waa in la sameeyo 15 maalin ganacsiyeed gudahood oo ka bilaabma helitaanka wargelinta go'aanka.

**Shuruudaha Loo Shaqeeyaha ee U Hoggaansanka Qorshaha Gaarka ah:**

**44. Miyaa beddelkayga qorshaha gaarka ah laga noqon karaa muddo saddex-sano ah gudahood.**

Haa, haddii Waaxdu ogaato in shuruudaha iyo xeerarka lagu xadgudbay. Tusaaleyaasha xadgudubku waxa ay noqon karaan loo shaqeeye gudbin waayey warbixinada mushaharka ee saddex-biloodka ah ama gudbin waayey warbixinada xogta haddii loo shaqeeyuhu adeegsanayo qorshe caymis dhamaystiran.

**45. Waa maxay cawaaqibta ka dhalanaysa ku xadgudubka shuruudaha iyo xeerarka qorshe la ansixiyey?**

Ku xadgudubka shuruudaha iyo xeerarku waxa ay keeni karaan ka noqoshada beddelka loo shaqeeyaha ayaana masuul ka noqon doona siinta kharashyada caymiska PFML laga bilaabo saddex-biloodka koowaad ee ka dambeeya ka noqoshada. Loo shaqeeyeyaasha leh beddel laga noqday dib uma codsan karaan beddel cusub muddo saddex sano ah oo ka bilaabma taariikhda ka noqoshada. Haddii qorshaha loo shaqeeyuhu uu yahay is-caymin, kharashbixinada aan la bixin ee kharashyada caymiska waxa laga jaran karaa damaanadda lacageed ee la bixiyey.

**46. Waa maxay shuruudaha warbixinta ee jira inta lagu gudo jiro muddo beddel la ansixiyey?**

Loo shaqeeyeyaashu waa inay sii wadaan warbixinada musharada inay saddex-biloodkiiba kusoo gudbiyaan Barta Fasaxa Mushaharka La Qaato ee Maine. Masuuliyadda kharashyada caymisku waxa ay noqon doontaa eber warbixinadan inta lagu gudo jiro muddada beddelka. Loo shaqeeyeyaashu waa inay sidoo kale warbixin xogta sanadlaha ah ku gudbiyaan Barta Fasaxa Mushaharka La Qaato ee Maine ugu dambeyn Luulyo 1 deeda ee sanad kasta kaas oo muujinaya cabbirada waxqabadka ee qorshaha gaarka ah. Gudbin la'aanta warbixinada loo baahan yahay waxa ay keeni kartaa in laga noqdo beddelka qorshaha gaarka ah.

**47. Xaddi intee ah ayaa laga jari karaa shaqaalaha si loogu bixiyo siyaasadda beddelka qorshaha gaarka ah ee la ansixiyey?**

Loo-shaqeeyaha waxa dhici karta in laga jaro waxa shaqaalaha laga rabo inuu ku bixiyo qorshaha Gobolka si uu ugu bixiyo siyaasadda beddelka qorshaha gaarka loo leeyahay marka la ansixiyo. Tani ugu badnaan waa .5% mushaharka shaqaalaha ilaa ugu yaraan 2028.

**48. Miyaan ka jari karaa in ka badan .5% mushaharka haddii siyaasadda qorshaha gaarka loo leeyahay ay kharash ahaan ka badan tahay wadar ahaan 1%?**

Maya - Lacagta ugu badan ee shaqaale ku bixin karo siyaasadda qorshaha gaarka ah ee la ansixiyey waa .5% mushaharka, xataa haddii siyaasaddu tahay in ka badan wadar 1% ee mushaharka.

**49. Miyaan ka jari karaa .5% mushaharka shaqaalaha haddii siyaasadda qorshaha gaarka loo leeyahay ay kharash ahaan ka yar tahay wadar ahaan 1%?**

Haa - shuruucda iyo qawaaniintu kaliya waxay dhigayaan in shaqaalaha aan lagu dallicin wax ka badan wuxuu ku bixin lahaa qorshaha Gobolka, oo ah .5% mushaharka ilaa ugu yaraan 2028.

**50. Waxa aan leeyahay beddel qorshe gaar loo leeyahay oo is-caymin oo la ansixiyey, balse waxa aan dib u dhigay bilawga gunnooyinka illaa Maajo 1, 2026 sida ay ogol yihiin xeerarku. Ma bilaabi karaa ka jaritaanka shaqaalaha si aan ugu bixiyo gunnooyinka mustaqbalka uu bixin doono qorshahayga gaarka loo leeyahay ee is-caymintu?**

Haa. Si aad u aragto jaantus sharraxaadeed oo muujinaya goorta ka dhaafitaanada iyo ka jaritaanadu ay bilaabmaan ee dhammaadaan marka loo eego nooca qorshaha gaarka ah ee adeegsada taariikhaha aan dhabta ahayn ee tusaalaha ah, fadlan guji linkiga hoose si aad wax dheeraad ah u ogaato: PrivatePlanapprovalanddeductionstimeframesv2.pdf

**Cusbooneysiinta beddel la ansixiyey:**

**51. Sidee baa loo shaqeeye u cusboonaysiin karaa beddel qorshe gaar ah oo la ansixiyey?**

Loo shaqeeyeyaashu waa inay codsadaan cusboonaysiinta ugu yaraan 30 maalmood kahor taariikhda dhammaadka beddelkooda la ansixiyey. Waaxdu waxa ay ogaysiin doontaa loo shaqeeyeyaasha iyada oo u maraysa Barta Fasaxa Mushaharka La Qaato ee Maine 60 maalmood kahor taariikhda dhammaadka beddelka la ansixiyey ee loo shaqeeyaha.

**52. Maxaa dhacaya haddii loo shaqeeye aanu cusbooneysiin beddel qorshe gaar ah oo la ansixiyey?**

Haddii loo shaqeeye aanu codsan dib u cusbooneysiinta beddelkiisa ama dib u cusboonaysiinta la diido, loo shaqeeyaha ayaa masuul ka ah in uu u xawiro kharashyada caymiska Sanduuqa PFML laga bilaabo maalinta dhicitaanka beddelka.

**Isbeddellada & Joojinnada Beddelka Qorshaha Gaarka ah:**

**53. Maxaa dhacaya haddii shirkadda caymisku go'aansato inay joojiso bixinta qorshe caymis dhamaystiran?**

Haddii shirkad caymis go'aansato inay joojiso bixinta qorshe caymis dhamaystiran, shirkadda caymisku waa inay ogaysiiso Xafiiska Caymiska ee Maine saddex bilood kahor isla markaana siiso wargelin lix bilood ah loo shaqeeyeyaasha ay khusayso kahor cusbooneysiin-la'aanta.

**54. Miyaa loo shaqeeye joojin karaa beddel la ansixiyey kahor inta aanu dhicin wakhtigiisu?**

Loo shaqeeyeyaashu waxa ay keliya codsan karaan joojin haddii ay muujin karaan jiritaanka saameyn ganacsi oo taban oo toos ah oo laxaad leh, sida caddeynta korodh ah kharashka caymiska ah oo lama filaan ah oo aan macquul ahayn. Haddii ka noqoshada ay ansixiso waaxdu si loo shaqeeyuhu ugu laabto daboolidda sanduuqa Gobolka, loo shaqeeyuhu ma codsan karo beddel kale muddo 3 sano ah. Codsiyada ka laabashada beddel waxa lagu gudbin karaa Barta Fasaxa Mushaharka La Qaato ee Maine.

**55. Miyaa loo shaqeeye isbeddelo ku sameyn karaa qorshe la ansixiyey?**

Loo shaqeeyeyaashu waa inay ogaysiiyaan Waaxda ugu yaraan 60 maalmood kahor wixii isbeddelo la taaban karo ah ee ay ku sameynayaan qorshaha isla markaana waa inay helaan ogolaansho qoraal ah.

**56. Miyaa loo shaqeeye kala wareejin karaa qorshe la ansixiyey (isaga oo u kala wareejinaya shirkadaha caymiska ama u kala wareejinaya caymis dhamaystiran iyo is-caymin)?**

Loo shaqeeyuhu waxa uu codsan karaa beddel qorshe gaar ah oo cusub isaga oo u maraya Barta Fasaxa Mushaharka La Qaato ee Maine inta lagu gudo jiro muddada beddelka. Fiiga codsiga iyo maamulka waa in dib loo bixiyo haddii la ansixiyana, 3 da sano ee beddelka ayaa dib u bilaaban doonta iyada oo lagu salaynayo taariikhda ansixinta ee cusub.

**<u>Heshiisyada Gorgortanka Wadajira iyo Qorshayaasha Gaarka ah:</u>**

**57. Sidee xeerka ku jira sharciga PFML ee ku saabsan heshiisyada gorgortanka wadajira ee qaybta dawladdu u khuseeyaa qorshayaasha gaarka ah?**

Sida xeerku dhigayo, si qorshe gaar ah u mutaysto beddel, qorshuhu waxa waajib ah inuu bixiyo cayminta faa'idada ee dhammaan shaqaalaha ururkiisa si isku mid ah, iyadoon la eegin xaaladda heshiiska gorgortanka wadajira (CBA).

## <u>Su'aalaha la Xiriira Gunnooyinka iyo Ogaysiiska</u>

**<u>Shuruudaha Ogaysiiska:</u>**

**58. Maxay loo shaqeeyayaashu u baahan yahay inay ku daraan ogaysiiska qoran ee ku saabsan barnaamijka PFML ee ku socdo shaqaalaha?**

- Gunnooyinka lagu heli karo barnaamijka.
- Xuquuqda shaqaalaha ee inay helaan ilaalin shaqo iyo sii wadista caymiska caafimaadka.
- Hannaanka xeraysiga sheegasho.
- Loo shaqeeyayaasha waxa looga baahan yahay inay ku soo dhejiyaan boostar ku saabsan PFML goobta shaqada.

Ogaysiiskan waxa waajib ah in la bixiyo wakhtiga shaqaalaynta.

**59. Waa maxay nooca ogaysiiska ay waajib tahay shaqaaluhu inay siiyaan loo shaqeeyayaasha kahor intaysan fasax qaadan?**

Shaqaalaha waxa waajib ku ah inay bixiyaan ogaysiis qoran ugu yaraan 30 maalmood kahor fasaxa uu qofka shaqaalaha og yahay inuu u baahan yahay inuu qaato. Hase yeeshee, xaaladaha qaar ee fasaxyada la sii ogaan karo, ogaysiis 30 maalmood kahor ah waxa dhici karta inay ku yar tahay haddii nooca shaqada loo qabto loo shaqeeyuhu ay u baahan tahay ogaysiis wakhti intaas ka badan oo fasaxuna uu saamayn karo shaqada loo shaqeeyaha.

**60. Waa maxay nooca ogaysiiska ay waajib tahay in shaqaaluhu siiyo loo shaqeeyaha haddii loo baahdo fasax xaalad gurmad ah?**

Haddii xaalad gurmad ah timaad, shaqaaluhu waxa waajib ah inuu ogaysiis siiyo loo shaqeeyaha sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogal ah marka la eego xaaladda lagu jiro. Ogaysiiska waxa waajib ah inuu qoraal ahaado, waxaana ka mid noqo kara iimeyl ama farriin qoraal ah oo loo diro loo shaqeeyaha. Ogaysiiska sidoo kale waxa shaqaaluhu u sii marin karaa loo shaqeeyahaya xubin qoyska ah ama bixiyaha daryeelka caafimaadka.

**61. Miyuu shaqaalaha fasaxa ku maqan leeyahay ilaalin shaqo?**

Haa, haddii shaqaaluhu la joogay loo shaqeeyaha ugu yaraan 120 maalmood oo xiriir ah, waxa waajib ah in shaqaalaha lagu celiyo shaqadiisii hore ama shaqo u dhiganta markuu fasaxa ka soo laabto. Shaqaalaha u shaqaynayey loo shaqeeyaha in ka yar 120 maalmood oo xiriir ah, xaq uma laha ilaalin shaqo intuu fasaxa ku jiro.

**62. Waa maxay macluumaadka loo shaqeeye codsan karo marka shaqaale uu ogaysiis siiyo?**

- Nooca fasaxa (tus., fasax qoys, fasax caafimaad, fasax badbaado ama xaalado la xiriira xubnaha qoyska oo shaqo ciidan u bixi raba dhawaan).
- Taariikhda la filayo inuu bilaabmo iyo muddada uu soconayo fasaxu.
- Haddii fasaxu noqon doono mid xiriirsan, mid kala googo'an ama mid saacadaha shaqada la yareeyey.

Loo shaqeeyayaashu ma codsan karaan diiwaanada caafimaad ama macluumaadka shakhsiyeed.

**63. Maxay tahay waajib in loo shaqeeye sameeyo kadib marka loo sheego sheegashada shaqaalaha?**

Haddii loo shaqeeyuhu oggolaado jadwalka fasaxa la soo jeediyey, tallaabo kale loogama baahna, codsigana si dhakhso ah ayaa looga hawlgalaa. Haddii loo shaqeeyuhu uusan oggolaan jadwalka fasaxa la soo jeediyey uuna rumaysan yahay in fasaxuhu abuurayo dhibaato laxaad leh, loo shaqeeyaha waxa waajib ku ah:

- Inuu gudbiyo wixii macluumaad la xiriira ee ku saabsan mutaysiga shaqaalaha ama jadwalka fasaxa
- Inuu bixiyo caddayn uu ku taageerayo sheegashada dhibaatada laxaadka leh

Waxaas oo dhan waxa waajib ah inuu ku sameeyo 10 maalmaha la shaqeeyo ah laga bilaabo marka loo shaqeeyuhu helo ogaysiiska sheegashada.

**<u>Dhibaato Laxaad Leh:</u>**

**64. Waa maxay "dhibaato laxaad leh," miyuuna loo shaqeeyuhu fasaxa diidi karaa isagoo cuskanaya iyada?**

Maya, loo shaqeeyayaashu Fasaxa Qoyska iyo ka Caafimaadka ee Mushaharka La Qaato (PFML) ma diidi karo isagoo cuskanaya dhibaato laxaad leh inay shaqada soo gaarto. Hase yeeshee, dhibaato laxaad leh waa wax loo shaqeeyayaashu ay xisaabta ku darsan karaan markay nidaaminayaan jadwalka fasaxa shaqaalaha.

**65. Waxaa la tixgaliyo "dhibaato laxaad leh"**

Dhibaato laxaad leh waxay ka dhigan tahay saamayn wayn oo ku dhacda sida shaqadu u socoto ama kharash wayn oo la galo kaasi oo aan wax looga qaban karin muddada ogaysiiska shaqaaluhu ku bixiyey
Waxa qiimayntiisu ku salaysan tahay khayraadka maaliyadeed, xajmiga shaqaalaha iyo nooca suuqa ee loo shaqeeyaha.

**66. Goorma ayuu loo shaqeeye ka caban karaa dhibaato laxaad leh?**

Loo shaqeeye wuxuu ka caban karaa dhibaato laxaad leh kaliya kadib markuu helo ogaysiiska codsiga shaqaale PFML kaga rabo Maareeyaha.
Loo shaqeeyuhu wuxuu markaa haystaa 10 maalmaha shaqada ah inuu:

- Ku siiyo sharraxaad qoran shaqaalaha iyo Maareeyaha taasi oo uu ku sheegayo saamaynta gaarka ah ee fasaxa la codsaday ku leeyahay shaqada
- Ku daro wixii jadwal fasax oo beddiil ah oo la soo jeediyey
- Keeno caddaymo hadduu rumaysan yahay jadwalka fasaxu inuu keeni doono dhibaato laxaad leh.

**67. Maxaa dhacaya haddii shaqaalaha iyo anigu aanu isla oggolaano in jadwalka fasaxiisu uusan keeni doonin dhibaato laxaad leh?**

Haddii fasaxa shaqaalahaagu codsaday uusan aad u arbushi doonin sida shaqadaadu u socoto oo uusan keeni doonin dhibaato laxaad leh, waxaad awood u yeelan doontaa inaad saxeexdo ka tanaasulid aad ku sheegayso in sheegashada shaqaalaha hore looga socon karo adigoon sugin 10 maalmaha la shaqeeyo ah ee haddii kale ay ahayd inaad walaaca ku sheegto.

**<u>Gunnooyinka Fasaxa:</u>**

**68. Sidee gunnooyinka PFML loo xisaabiyaa?**

Sanad gunneedka shaqaalaha waxa uu bilaabmi doonaa Axadda ka horraysa taariikhda dhabta ah ee fasaxiisa waxana uu dhammaadaa 52 toddobaad kadib.

**69. Fasaxa PFML oo intee leeg ayuu shaqaaluhu qaadan karaa sanad gunneedka?**

Shaqaale wuxuu qaadan karaa ilaa 12 toddobaad oo fasax mushahar la qaato ah muddada sanad gunneedkooda iyadoo la eegayo sababo u qalmitaan.

**<u>Ilaalinta Shaqada & Gunnooyinka ee Shaqaalaha:</u>**

**70. Miyaa shaqaalaha loo dammaanad qaadaa ilaalin shaqo intay ku jiraan PFML?**

Haa. Shaqaalaha loo shaqeeyaha u shaqaynayey ugu yaraan 120 maalmood oo xiriir ah kahor intuusan qaadan fasaxa PFML wuxuu xaq u leeyahay inuu:

- Ilaalin shaqo: Waxa waajib ah in lagu soo celiyo isla shaqadii ama mid u dhiganta markuu soo laabto.
- Sii wadashada caymiska caafimaadka: Loo shaqeeyayaasha waxa waajib ku ah inay ku sii wadaan daboolidda shuruudihii hore sidii oo shaqaaluhu uusan fasax ku jirin.

**71. Miyey qaadashada PFML saamayn ku leedahay awoodda shaqaalaha ee inuu kasbado gunnooyin kale (sida PTO ama komishanada)?**

Maya. Qaadashada PFML ma saamayso xuquuqda shaqaalaha ee inuu qaato ama helo gunnooyinka shaqada ee kale. Inta uu fasaxa ku jiro, shaqaaluhu wali wuxuu xaq u leeyahay inuu:

- Qaato fasax nasasho ama fasax xanuun (haddii siyaasadda loo shaqeeyuhu siinayso wakhtigan).
- Sii wado kasbashada komishan, dallacsiin, gunnada waayeelnimada, ama aqoonsiga waxqabadkiisa.
- Joogteeyo ka qaybqaadashada qorshayaasha ama barnaamijyada gunnada.

Tani waxay ka dhigan tahay loo shaqeeyayaashu waxa waajib ah inay u arkaan wakhtigan fasaxa sidii oo qofka shaqaalaha uu si caadi ah u shaqaynayey marka la eego gunnooyinkan.

**72. Maxaa ku dhacaya caymiska caafimaadka shaqaalaha muddada fasaxa PFML?**

Muddada fasaxa, loo shaqeeyayaasha waxa waajib ku ah:

- Sii wadaan daboolidda caymiska caafimaadka shaqaalaha.
- Qaybtooda ku daraan kharashka caymiska heer la mid ah sidii oo qofka shaqaalaha uu shaqaynayey.
- Shaqaaluhu wali isagaa ka sii masuul ahaanaya qaybta shaqaaluhu bixiyo kharashka caymiska.
- Ku sii joogtaynta daboolidda xaalado la mid ah sidii oo qofka shaqaalaha ah uusan fasax qaadan.

**73. Sidee ilaalinta shaqadu ula xiriirtaa shaqaalaha fasaxa qaata iyagoon ogaysiin loo shaqeeyaha?**

Shaqaalaha waxa looga baahan yahay inuu siiyo ogaysiis macquul ah loo shaqeeyaha markuu rabo inuu fasax galo, waxaana ku waajib ah inuu ogaysiiska u bixiyo sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogal ah hadday jirto xaalad gurmad ah oo fasaxa keenaysaa. Haddii shaqaaluhu ku fashilmo inuu bixiyo ogaysiis macquul ah kadib bilaabidda fasax xaalad gurmad ah, isagoo ku fashilmay inuu raaco shuruudaha ogaysiiska caadiga ah ee loo shaqeeyaha ee ka maqaanshaha shaqada oo aysan isla markaana jirin duruufo aan caadi ahayn ama kallifaya oo u diidaya shaqaalaha inuu bixiyo ogaysiis macquul ah, markaa shaqaaluhu xaq uma yeelan karo ilaalin shaqo haddii fasaxa uu ansixiyey Maareeyuhu.